Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah
# الجريدة الرسمية
# Official Bulletin

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 Maarso 2023** **Lr. 1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# BILAHA

# JANUARY, FEBRUARY, MAARSO

# 2023

**Taariikh: 30/03/2023**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 121**

**XEERKA XEER NIDAAMIYAHA HAY'ADDA BATROOLKA SOOMAALIYEED**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuuka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **WBM/XW/GB/0029/2023** oo ku taariikheysan **08/03/2023**,kuna saabsan codsi Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.

**Markuu arkay:** Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/03/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qabo in la meel-mariyo **Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.**

**Wuxuu Xeeriyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.027.03.23 ee 30/02/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

## Qodobka 2aad

Waxaa Waasaradda Batroolka iyo Macdanta loo igmaday fulinta iyo meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.

## Qodobka 3aad

Xeerka Xeer Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN 061-23
TAARIIKH: 12-09-2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Wasaaradda Batroolka Iyo Macdanta**

# Xeer-Nidaamiyaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (H.B.S )

Lagu Soo Saaray Si Waafaqsan Sharci Lr. 19 Soo Baxay 08 Febaraayo 2020

Ansixiyeen Golaha Wasiiradda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

March 2023

Xeer Gole Wasiir

Xeer-nidaamiyaha Hey'adda Batroolka Soomaaliya Lr. Xx soo baxay xx Diseembar 2022

**Qodobka 1aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha**

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabayaa Xeer-nidaamiyaha Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed, wuxuuna dhaqangalayaa markii uu meelmariyo Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 2aad: Ereybixin**

Erayada soo socda waxay yeelanayaan micnaha mid walba ku hor qoran haddii aysan ka hor imaanayn micnaha lagu siiyay Sharciga Batroolka:

| | |
|---|---|
| 1. **H.B.S** | Waxaa loola jeeda Hay'adda Batroolka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee lagu dhisay Qodobka 19aad ee Sharci Lr. 19 ee soo baxay 08 Febaraayo 2020. |
| 2. **Xeer-nidaamiye** | Waxaa loo la jeedaa Xeer-nidaamiyaha H.B.S. |
| 3. **Habraacyada caalamiga ee Wanaagsan:** | Waxaa loola jeedaa hab-dhaqanka ugu wanaagsan marka lagu gudajiro hawlaha batroolka, kaas oo si guud loo gartay in uu wanaagsanyahay, dhawrayo badqabka, hufnaanta iyo hab-sami u socodka shaqada intaba, sidoo kalana lagu dabaqi karo heer caalami marka la helo xaalado ku haboon. |
| 4. **Guddi** | Waxaa loola jeedaa Guddiga Maamulka H.B.S ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |
| 5. **Guddoomiye:** | Waxaa loola jeedaa guddoomiyaha Guddiga ahna Maareeyaha Guud ee H.B.S. |
| 6. **Wasiir:** | Waxaa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta. |

7. **Wasaaradda:** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.

8. **Horumarin:** Waxaa loola jeedaa qorshaynta, bud-dhigga, dhisidda iyo samaynta goobo aan looga maarmayn soo saarista batroolka.

9. **Goob:** Waxaa loola jeedaa:

    i. Dhisme kasta, qalab ama kaabe sida: dhuumaha, xarumaha koontroolka dhuumaha, xarumaha bamka iyo cadaadintooda ama qalabka kasta oo loo isticmaalo si loo fuliyo hawlaha batroolka la xiriira;
    ii. Noocyada kala duwan gaadiidka badda ee loo isticmaalo qodidda ama taageerada hawlaha batroolka ee socda; iyo
    iii. Noocyada kala duwan gaadiidka badda ee loo adeegsado xamuulka jumlada ah ee batroolka markii lagu xiriiriyo goob raridda batroolka loogu talagalay.

10 **Rukhsadle Idman** Waxaa loola jeeda rukhsadle ama shirkad kasta oo mas'uul uga ah rukhsadle ama tiro rukhsadlayaal ah maaraynta shaqa maalmeedka hawlaha batroolka.

11 **Batrool:** Waxaa loola jeedaa:

    i. Hydrocarbon kasta oo iskiis u samaysmay, ha lahaado qaab gaas, dareere ama adke;
    ii. Isku jir kasta oo hydrocarbon ah oo iskiis u samaysmay, ha la haado qaab gaas, dareere ama adke, kaas oo laga soo saaray harooyinka caadiga ah ama kuwa aan caadi ahayn.

| | |
|---|---|
| 12 **Wax soosaar:** | Waxaa loola jeedaa hawlaha la xiriira shidaalka iyo gaaska laga soo saaro harooyinka iyo in daabulis loo diyaariyo taas oo looga rarayo ceelka shidaalka loona rarayo barta xamuulka. |
| 13 **Sanduuqa dhexe:** | Waxaa loola jeedaa koontada uu ku dhacayo dhamaan dakhliga ka soo xarooda fulinta hawlaha batroolka. |

**Qodobka 3aad: Shakhsiyadda Qaanuuneed ee H.B.S**

1. H.B.S waxey yeelaneysaa shakhsiyad iyo jiritaan qaanuuneed iyo shaabbad rasmi ah, waxayna awood u leedahay inta ay ku gudajirto gudashada hawleheeda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan:
   I. Lahaanshaha, gacan ku haynta, bixinta hantida guurto iyo maguurto intaba;
   II. Inay wax dacwayso laguna dacweeyo shakhsiyaddeeda qaanuuniga ah; iyo
   III. Fulinta dhamaan hawlaha uu sharciga u banaynayo shakhsiyaadka qaanuuniga ah.

**Qodobka 4aad: Xarunta iyo xafiis-goboleedka H.B.S**

1. Xafiiska dhexe ee Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waa Muqdisho, magaalo- madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Xafiis Goboleedka H.B.S waxaa loo dhisayaa, laguna dhaqayaa isla markaasina xilkiisa u gudanayaa si waafaqsan Qodobka 19aadee Sharciga Batroolka.
3. Furista iyo ka howlgalka Xafiis Goboleed waxaa hagaya siyaasada dowladda iyadoo la tixgelinayo baahiyaha markaas taagan, waxaana Go'aaminayo Wasiirka Wasaarada, ka dib marka uu la tashi la sameeyo H.B.S

**Qodobka 5aad: Hawlaha H.B.S**

H.B.S waxay qabanaysaa:

i. Ilaalinta danaha qaranka ee ku aaddan baarista, horumarinta iyo soo saarista batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
ii. Dib-u-eegista iyo uga talobixinta Wasiirka arrimaha ku saabsan meel- marinta, wax ka bedelka iyo diidmada ee ku aaddan: qorshayaasha, codsiyada, warbixinnada, gorfeynta xogaha iyo macluumaad kasta oo uu soo gudbiyo codsade ama rukhsadle kuwaas oo ku saabsan bixin ama cusbooneysiin rukhsad sahmin ama soo saaris batrool;

iii. Fulinta tartanka furan ee ku saabsan bixinta heshiisyada wax soosaar wadaagga marka uu Wasiirka wareegto oggolaansho ku soo saaro;

iv. Kormeerka iyo xaqiijinta u hoggaansamidda siyaasadaha qaran, xeerarka, xeer-nidaamiyeyaasha iyo heshiisyada la xiriira hawlaha batroolka;

v. Xaqiijinta in qandaraasleyaasha, qandraasle-hoosaadyadooda iyo qof kasta oo ku lug leh hawlaha batroolka ay u hoggaansan yihiin shuruucda iyo xeer-nidaamiyeyaalka dhaqangalka ku ah;

vi. Xaqiijinta u hoggaansamidda siyaasadaha, shuruucda, xeerarka, heshiisyada iyo halbeegyada caafimaad, kuwa badqab iyo kuwa deegaan ee hawlgallada batroolka iyadoo la kaashanayo hay'adaha dowladeed ee khuseyso;

vii. Xaqiijinta u hogaansamidda waajibaadka la xiriira cabbirka maaliyadeed inta lagu guda jiro soo saaristas batroolka si waafaqsan shuruucda dhaqan galka ah;

viii. Korjoogteynta  iyo nidaaminta hawlaha batroolka, oo ay ka mid tahay qiyaasta kaydka, cabirka mugga shidaalka iyo gaaska la soo saaro, iyo fulinta dhamaan dabagallada iyo baaritaannada qaybta ka ah hawlaha H.B.S ee ku xusan xeerarka dhaqangalka ku ah;

ix. Xaqiijinta in hawlaha batroolka ay yihiin kuwo leh qorshooyin iyo dhaqaale ku salaysan qiimayn jaango'an kuwaas oo horseedi kara in batroolka loo soo saaro sida ugu waxtar badan;

x. Dhiirragelinta iyo horumarinta ka qeybgalka dadka Soomaaliyeed ee ku aaddan adeegyada hawlaha batroolka.

xi. Xaqiijinta dhismaha kaydka qaran ee xogaha batroolka, oo ay qayb ka yihiin kaydka dhexe ee xogta rukhsadlayaasha iyo dhamaan shakhsiyaadka ku lugta leh hawlaha batroolka, maaraynta xogta batroolka iyo diyaarinta warbixinno joogta ah iyo qoraallo daabacan oo ku saabsan hadba meesha ay marayaan hawlaha batroolka.

xii. Xaqiijinta iyo uga tala bixinta Wasiirka arrimaha ku saabsan meel-marinta, wax ka beddelka iyo diidmada codsiyada hawlaha sahan ee ku xusan qorshe- hawleedka sanadlaha ah, qorshaha sahan iyo adoroska wax soo saar, iyo dib u eegista iyo meel marinta miisaaniyadda ee uu soo gudbiyo rukhsadlaha;

xiii. Oggolaanshaha Wasiirka kadib, gelidda wadaxaajoodyada ku saabsan bixinta, wax ka beddelida, cusbooneysiinta, muddo kordhinta iyo ka bixidda heshiisyada batroolka;

xiv. Xaqiijinta iyo uga talo bixinta Wasiirka warbixinnada helitaanka batrool ee uu soo gudbiyo rukhsadle;

xv. Hubinta qalabka loo adeegsanayo cabirka maaliyadeed ee batroolka la soo saaro iyo bixinta oggolaanshaha adeegsigiisa;

xvi. Ka qaybgalka iyo ansixinta cabbirka batroolka si go'aan looga gaaro royaltiga, faa'idada batroolka ama gaaska oo ay yeelanayso Dawladda;

xvii. Qiimaynta, hubinta iyo bixinta oggolaanshiyaha shidaalka ama gaaska kharash ahaan ay u qaadanayaan rukhsadlayaasha;

xviii. Siinta xogta muhiimadda u leh hay'adaha Dawladda u xilsaaran ururinta canshuuraha, khidmadaha iyo royaltiga la xiriira hawlaha batroolka;

xix. Xaqiijinta iyo fududeynta jiritaanka tartan furan oo u dhaxeeya dhinacyada saddaxaad kuwaas oo ku beratamaya in ay adeegsadaan ama ka faa'iidaystaan kaabeyaasha iyo goobaha u dhisan in lagu fuliyo howlaha batroolka;

xx. Korjoogteynta xaaladaha shaqo iyo howl-fulineed ee Rukhsadlaha Idman si loo xaqiijiyo jiritaan tartan xalaal ah oo hufan kuna aaddan fulinta howlaha batroolka;

xxi. Qiimaynta heerka gebagabo ee wax soo saarka batrool iyo hakinta hawlaha batroolka iyo qorshayaasha dib-u-furfuridda agabka iyo xarumaha batroolka;

xxii. Samaynta cilmi baaris ku aaddan hababka ugu haboon ee lagu sahamin karo, loo soo saari karo, loogana faa'iideysan karo batroolka iyo walxaha laga sameeyo ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

xxiii. Fulinta hawl kasta oo uu igmado ama ka dalbado Wasiirka taas oo loo arko in ay la xiriirto ama ka dhalanayso hawlaheeda ku xusan Xeer- nidaamiyahan;

xxiv. Markii ay gudanayso hawleheeda, mas'uuliyaddeeda iyo waajibaadkeeda, H.B.S waxay la tashanaysaa wada shaqayn dhawna la yeelanaysaa Wasiirka iyo howlwadeennada Wasaaradda. Sidoo kale, H.B.S waa in ay wadashaqeyn la yeelataa wasaaradaha, Waaxyaha iyo wakaaladaha kuwaas oo waajibaadkooda, yoolalkooda iyo shaqadooda ay xiriir la leedahay H.B.S .

xxv. H.B.S waxaa masuul ka tahay:

  i. fulinta shuruudaha heshiisyada iyo rukhsadaha ku saabsan sahminta iyo soosaarista batroolka ee lagu galay ama lagu bixiyay si waafaqsan Sharciga Batroolka;

  ii. Kala shaqeynta hey'adaha dowlada Federaalka Soomaaliya arrimaha ku saabsan Arurinta iyo soo xaraynta dhamaan lacaga kirada, royaltiga khidmadaha, ganaaxyada, canshuuraha iyo lacagaha kale ee ka dhasha heshiisyada shidaalka iyo dakhliga kale.

**Qodobka 6aad: Awoodaha H.B.S**

H.B.S waxay awood u leedahay:

1. bixinta ogolaanshiyaha howlgelidda sahanka horudhaca ah ee xirmo heshiis wax soo saar wadaagga iyadoo fulinaysa faritaanada iyo siyaasadda uu jaangooyey Wasiirka ee ku aaddan baaris aag uu Wasiirku cayimay Si waafaqsan qodobka 23aad ee Sharciga Batroolka;
2. Ka dib ogolaanshaha Wasiirka, gelidda wadaxaajoodyada heshiisyada wax soo saar Wadaagga si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa;
3. Bixinta ogolaanshiyaha isticmaalka dhuleed si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa;
4. Ka dib ogolaanshaha Wasiirka, ka qaadista qof rukhsadle ah culaysyo gaar ah oo uu la kulmo si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa;
5. Ka dib oggolaanshaha Wasiirka, wax ka bedelka iyo kala noqoshada rukhsad kasta si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa iyo shuruudaha rukhsadda;
6. Bixinta iyo dhaqan galinta tilmaamo lagu xaqiijinayo u hogaansamidda rukhsadda;
7. Uga tala bixinta Wasiirka arrin kasta oo la xiriira taabbagelinta, kormeerka, nidaaminta, sahanka, horumarinta iyo soo saarista batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya taasoo ku sallaysan hannaan sugan oo badqaba wax ku oolna ah isla markaana ilaalinaya badqabka deegaanka;
8. soojeedinta hageyaal iyo habraacyo jideynaya habbabka ugu habboon ee ugu bedqabsan ee lagu sahminayo, horumarinayo, soosaarayo loogana faa'iidaysanayo batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyadoo la ilaalinayo wanaagsanaanta iyo bedqabka deegaanka; iyo
9. Fulinta howlaha iyo faritaanada uga yimaada Wasiirka sida ku cad qodobka 11aad.

**Qodobka 7aad: Heshiisyada Sahminta Batroolka**

Gelidda heshiisyada ku saabsan sahminta batroolka waxaa la waafajinayaa tallaabooyinka soo socda:

1. Wasiirku ayaa soo gaaraya go'aanka ah in la sameeyo Sahmin aag isagoo tixgelinayo siyaasadda xukuumadda iyo siyaasadda Wasaaradda ee ku aaddan horumarinta iyo ka faa'idaysiga Khayraadka ku jira barriga iyo badda hoosteeda
2. Wasiirku wuxuu magacaabayaa guddi khubarro oo gelaya wadaxaajoodyada ku aaddan heshiiska sahminta batroolka. Guddiga khubarrada ayaa u gelaya wadaxaajoodyada si waafaqsan Sharciga Batroolka, Xeer nidaamiyeyaalka iyo

siyaasadda Xukuumadda ee ku aaddan helidda xogaha cilmiyaysan ee lagu xaqiiqsanayo jiritaanka batrool ku kaydsanaan kara geyiga Soomaaliya.

3. Wasiirku, Kaddib marka uu ka baaraandego in qodobbada heshiisku waafaqsan yihiin Sharciga Batroolka, Xeer nidaamiyeyaalka iyo siyaasadda Xukuumadda ee ku aaddan horumarinta howlaha batroolka, wuxuu saxiixayaa heshiiska sahminta batroolka.

### Qodobka 8aad: Wadaxaajoodka tooska ah ee heshiisyada wax soosaar wadaagga

H.B.S waxay raaceysaa habraaca soo socda marka ay galeyso wadaxaajoodka tooska ah ee ku saabsan Heshiisyada Wadaagga Wax Soo Saarka:

1. Wasiirka, isagoo fulinaya siyaasadda Xukuumadda, wuxuu farayaa H.B.S in ay gorgortan ama wadahadal la gasho shirkad ama shirkado ay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya u aragto in dan qaran ku jirto.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimmeyn kaalinta hoggaamineed ee H.B.S ee ku aaddan wadaxaajoodka, Wasiirka wuxuu magacaabayaa khubarro iyo xeeldheerayaal aqoon iyo khibrad gaar ah u leh arrimaha ka faa'iideysiga batroolka si ay uga qeybgalaan wadaxaajoodka.
3. Marka ay H.B.S soo gunaanado gorgortanka ku aaddan Heshiiska Wadaagga Wax Soosaarka waxa ay u gudbineysaa Wasiirka nuqulka rasmiga ah muddo todobo maalmo shaqo gudahood.

### Qodobka 9aad: Habraaca tartanka furan ee bixinta heshiisyada wadaagga wax soosaar

Marka la fulinayo howlaha tartanka furan ee Heshiisyada Wadaagga Wax Soosaarka ee ku sheegan qodobka 26aad ee Sharciga Batroolka, waxaa waajib ah in la raaco tallaabooyinka soo socda:

1. Wasiirka, isagoo fulinaya siyaasadda Xukuumadda isla markaana tixgelinaya soojeedinta H.B.S , wuxuu go'aan ka gaarayaa xilliga ugu habboon fulinta howlaha tartanka furan ee bixinta Heshiiska Wadaagga Wax Soo Saarka.
2. Wasaaradda ayaa mas'uul ka ah maareynta arrimaha siyaasadeed iyo midda korjoogteeneed ee ku xeeran fulinta howlaha tartanka furan, halka H.B.S ay u xilsaarnaaneyso arrimaha farsamo ee fulinta tartanka furan.
3. Iyadoo aan waxba loo dhimmeyn kaalinta hoggaamineed ee H.B.S ee ku aaddan wadaxaajoodka inta lagu gudajiro tartanka furan, Wasiirka wuxuu magacaabayaa

khubarro iyo xeeldheerayaal aqoon iyo khibrad gaar ah u leh arrimaha la xiriira sida loo maareeyo tartan furan si ay uga qeybgalaan wadaxaajoodka tartan furan.

4. Marka ay H.B.S soo gunaanado gorgortanka ku aaddan Heshiiska Wax Soo Saarka Wadaagga, waxa ay u gudbineysaa Wasiirka nuqulka rasmiga ah muddo soddon maalmo shaqo gudahood.

**Qodobka 10aad: Hab-dhaqanka shaqo ee H.B.S**

1. H.B.S waxay hawleheeda iyo waajibaadkeeda u gudanaysaa, awoodeheedana u dhaqangalinaysaa si:
   i. Waafaqsan Sharciga Batroolka, siyaasaddaha iyo xeer-nidaamiyeyaalka lagu fulinayo Sharciga Batroolka oo ay dejiso Xukuumadda;
   ii. Hufan oo maangal ah;
   iii. Cadaalad ah isla markaana macquul ah;
   iv. Aan eex lahayn;
   v. Ku salaysan tartan xalaal ah.
2. Iyadoo aan wax loo dhimayn saamaynta guud ee faqradda kore ee Qodobkaan, H.B.S markii ay xilkeeda gudanayso waxay:
   i. Ku korjoogtaynaysa rukshadleyaasha shaqowanaagga, dhaqaalaynta hantida iyo khayraadka, badqabka deegaanka iyo noolaha inta ay ku gudajiraan hawlaha batroolka;
   ii. Xaqiijinta in rukhsadlayaasha ay fuliyaan hawlaha batroolka ee lagu siiyay rukhsadda;
   iii. Horumarinaysaa tartanka loo galayo hawlaha batroolka;
   iv. Xaqiijinaysaa hufnaanta la xiriirta hawlaha batroolka iyo H.B.S;
   v. U dhawraysaa habraacyada maaliyadeed oo ay dhigayaan Shuruucda dalka.

**Qodobka 11aad: Sugidda Shaabbadda H.B.S**

1. Shaabadda rasmiga ah ee H.B.S waxay noqonaysaa qaabka ay go'aamiso H.B.S isla markaana uu meelmariyo Wasiirka, waxaana gacanta ku haynaya Gudoomiyaha (Maareeyaha Guud) waxaana lagu suntayaa qoraallada rasmiga ah ee H.B.S

2. Guddoomiyaha H.B.S iyo Xoghayaha Guud ayaa mas'uul ka noqonaya gacan ku heynta Shaabadda H.B.S iyo adeegsiga Shaabadda.

**Qodobka 12aad: Awoodda hagitaan iyo korjoogteyn ee Wasiirka ku leeyahay H.B.S**

Wasiirku wuxuu ku hagayaa H.B.S:

1. Si waafaqsan qodobka 19 (1) ee sharciga Batroolka, HBS waa Hay'ad ka tirsan wasaaradda Batroolka kuna shaqaysa siyaasadda, istraatejiyada iyo qorshaha wasiirka, si loo hormariyo loogana faa'idaysto soo saarka batroolka iyo gaaska.
2. Waxuu ku hagayaa wixii ku aaddan siyaasado, shuruuc, xeer-nidaamiyeyaal iyo qorshe kasta oo ay tahay in la dhawro ayna fuliso H.B.S intii ay ku jirto gudashada xilkeeda.
3. Diyaarinta iyo hirgelinta siyaasadaha lagu maaraynayo qaab-dhismeedka hey'adda, shaqaalaha iyo shuruudaha shaqada, diyaarinta qalabka iyo adeegsiga miisaaniyadda loo qoondeeyay.
4. Diyaarinta iyo fulinta siyaasadaha, qorsheyaalka iyo meelmarinta miisaaniyadda ku saabsan dhisidda karaanka iyo kobcinta awoodda hey'adeed ee HBS ;
5. Fulinta tabbabaro, aqoon-kororsi iyo samaynta cilmi baaris la xiriira howlaha H.B.S.
6. Diyaarinta iyo dib-u-eegista miisaaniyad sanadeedka H.B.S taasi oo loo gudbinayo Wasiirka;.-
7. Diyaarinta iyo u gudbinta Wasiirka warbixinno tifaftiran oo ku saabsan maaraynta miisaaniyadda;
8. Soo gudbinta warbixinno, xogwarran iyo odoros xilliyeysan kuwaas oo ku saabsan howlaha H.B.S hadba sida Wasiirka faro;
9. Soo gudbinta caddaymo lagu xaqiijin karo warbixinnada, xogaha iyo odoroska H.B.S ay la wadaagto Wasiirka;
10. Maaraynta hantida H.B.S iyo dakhliga ka xarooda si waafaqsan shuruucda dalku leeyahay.

**Qodobka 13aad: Hagitaanka H.B.S ee Rukhsadlaha iyo u hoggaansamiddooda**

1. H.B.S waxay, wargalin qoraal ah oo la gaarsiiyo rukhsadlaha, ku siin kartaa hagitaanno ama faritaanno waafaqsan xeerka dhaqangalka ah iyo hab-raacyada caalamiga ah ee ugu wanaagsan si loo xaqiijiyo in sida ugu habboon loo soo saaro batroolka laguna dhiiirigeliyo in hawlagallada ka socda goobaha rukhsadaha lagu bixiyay ay noqdaan kuwo deegaanka iyo noolaha ilaalinaya.
2. Rukhsadlaha waa inuu u hoggaansamaa faritaannada ay soo saarto H.B.S si waafaqsan qodobka 12.1. Cabasho ku saabsan faritaanada, go'aannada iyo amarradaH.B.S waxaa loo qaadan karaa Maxkamadda Sare ee dalka si waafaqsan Qodobka 19aad(22) ee Sharciga Batroolka.

1. Haddii uu rukhsadluhu ku guuldaraysto ama uu dayaco u hoggaansamidda faritaannada xilliga ku jaango'an wargalinta kusoo baxday si waafaqsan qodobka 12.1, H.B.S waxay ku dhaqaaqi kartaa dhamaan ama qaar ka mid ah ku cad qoraalka wargelinta.
2. Kharashaadka ka dhasha qodobka 12aad waa qaan ay leedahay Dowladda tahayna in loo shubo Khasnadda Dawladda, waxaana lagu qaadi karaa dacwad la horgeeyo maxkamadda awoodda u leh, iyadoo aan wax loo dhimaynin suurtagalnimada in rukhsadlaha lagu xukumo fall sharci darro ah si waafaqsan Shuruucda dalku leeyahay.

**Qodobka 14aad: Guddiga Maamulka ee H.B.S**

1. Guddiga Maamulka H.B.S wuxuu ka koobnaanayaa laba xubnood oo matalaya Dawladda Federaalka, iyo min hal xubin oo kala matalaya mid kasta ka mid ah Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka, kuwa jira iyo kuwa samaysmi doona (xilligii ay samaysmaan) iyo Gobolka Banaadir.
2. Xubnaha Guddiga Maamulka H.B.S waxaa lagu xulanayaa aqoon, shaqa- wanaag, karti iyo hufnaan.
3. Dowlad Goboleed kasta iyo Gobolka Benaadir waxay u soo gudbinayaan Wasiirka magacyada labo (2) musharrax. Wasiirku wuxuu u gudbinayaa Golaha Wasiirada si loo ansixiyo xubnaha soo buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 19aad(3)(5) ee Sharciga Batroolka.
4. Muddo-xilleedka Guddiga, waa afar (4) sano. Golaha Wasiiradda waxay xilka ka qaadi karaa xubin ama xubnaha Guddiga xilli kasta si waafaqsan Sharciga Batroolka marka uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
5. Golaha Wasiiradda, oo ku salaynaya soojeedinta Wasiirka, ayaa magacaabaya Guddoomiyaha iyo Gudoomiye Ku-xigeenka Guddiga Maamulka H.B.S.
6. Qofka loo magacaabo Gudoomiyaha Guddiga H.B.S ayaa noqonaya Maareeyaha Guud ee H.B.S. Maareeyaha Guud wuxuu awood korjoogtayn iyo mid maamul ku yeelanayaa shaqaalaha H.B.S iyo shaqadooda. Haddii uu maqnaado Gudoomiyaha ama ay jagadiisa bannaanaato Gudoomiye Ku-xigeenka ayaa yeelanaya dhamaan awoodaha Gudoomiyaha.
7. Buuxinta boosaska bannaan ee Guddiga waxaa loo raacayaa habraacyada ku xusan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyahan.
8. Guddiga wuxuu masuul ka noqonayaa, iyadoo Wasiirkuna ku korjoogteenayo, fulinta siyaasadda, hawlaha iyo waajibaadka Guddiga iyo faritaanno kasto ama hawl kasta ee uu u igmado Wasiirka si waafaqsan Sharciga Batroolka.

**Qodobka 15aad: Howlaha iyo waajibaadka Guddiga**

1. Guddigu wuxuu kormeerayaa, korjoogteyn ku sameeynayaa Maareeyaha Guud iyo howlwadeennada Hey'adda si ay u hubiyaan gudashada waajibaadka shaqo ee hay'adda u xilsaartay si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa.
2. Si waafaqsan faqrada (1) aad, Guddiga wuxuu :
    a. Dib-u-eegista iyo uga talabixinta Wasiirka qorsheyaalka iyo barnaamijyada lagu fulinayo soosaari batrool uuna soo gudbiyo rukhsadle si loo meelmariyo;
    b. Ansixinayaa qorsheyaalka, barnaamijyada iyo miisaaniyadda H.B.S ee lagu fulinayo howlaha iyo waajibaadka H.B.S una gudbinayaa Wasiirka si uu meelmariyo;
    c. Dejinta xeerhoosaadka hagaya ama lagu maarayno fadhiyada iyo hannaanka go'aan gaarista guddiga iyo arrimaha kale ee lagama maarmaanka u ah habsami u socodka howlahooda. Guddiga wuxuu u gudbinayaa xeerhoosaadkiisa Wasiirka.
    d. kormeerayaa iyo dib u eegisna ku samaynayaa hawlaha iyo waxqabadka Maareeyaha Guud iyo howlwadeennada Hey'adda, ka dib marka aay xiriir la sameeyaan Maareeyaha Guud ama Xoghayaha Guud ee HBS kuna wargeliyaan kormeerkooda
    e. korjoogtaynayaa habka maaraynta miisaaniyadda H.B.S;
    f. dejinayaa iyo ansixinayaa qaab-dhismeedka Hey'adda iyo siyaasadaha lagu maaraynayo shaqaalaha iyo shaqada una gudbinayaa Wasiirka si uu meelmariyo;
    g. Uga talabixinayaa Wasiirka arrimaha ku saabsan horumarinta batroolka Soomaaliya;
    h. Guddiga wuxuu u soojeedin karaa Wasiirka shaqo ka joojin Guddoomiyaha. Soojeedinta Guddiga waa in ay ku saxiixan yihiin lix (6) xubnood isla markaasina soojeedintooda ku salaysan tahay sababaha soo socda:
        a. Ku xadgudbidda awoodda xafiiska;
        b. Wadashaqayn xumo carqaladaynaysa habsami u socodka howlaha H.B.S;
        c. Awood la'aanta qabashada shaqooyinka xafiiskiisa taasi oo ay sababtay caafimaad darro xagga jirka ama maskaxda ah;
        d. anshaxdarro iyo habdhaqan aan ku habboonayn xilgudashadiis; iyo
        e. xilgudasho la'aan.

3. Fulinta hawlaha kale ee uu u xilsaaro Wasiirka.

**Qodobka 16aad: Shuruudaha xubinnimada Guddiga**

1. Shakhsi uma qalmo in loo magacaabo ama uu sii ahaado xubin ka mid ah H.B.S haddii:

   i. Uusan ahayn muwaadin Soomaaliyeed ama yahay: milkiile, saamile, maamule, sarkaal, wadaage, ama uu ku lug leeyahay ganacsiga soo saarista, iibinta, gadidda, daabulidda, dhoofinta, soo dhoofsashada ama ka ganacsiga batroolka gudaha Soomaaliya ama leeyahay gacan ku haynta kaambiyaale, saami dayn ama saamiga shirkad ku guda jirto ganacsi noocaas ah.

   ii. Maxkamad ku caddeysay dambi uu qayb ka yahay isdabamarin ama khiyaano ku ridday xukuna kama dambeys ah.

   iii. Uu yahay mid musalafay oo aan dayn bixi karin.

   iv. Qofkii aqbalaa magacaabista loo magacaabo xubinnimada Guddiga ama guta xilka xubin ka mid ah Guddiga isagoo og in mid ama in ka badan xaaladaha ku xusan qodobka 14aad ay ku dabaqmayaan wuxuu galay fal dambiyeed.

   v. Qofku wuxuu galayaa dambi haddii isagoo xubin ka ah Guddiga ama uu ku sii jiro sii gudashada xilka xubinnimo uu helo, ama gacanta ku dhigo, si ugu jirta faa'ido toos ah ama mid dadban, isagoo u maraya qandaraas ama hab kale:

      a. Saamiyo ama faa'ido uu ku yeelanayo shirkad ka hawlgasha ama adeeg ka fulisa batroolka; ama

      b. Awoodda gacan ku haynta go'aannada guddiga ama maamulka rukhsadle.

**Qodobka 17aad: Xilwaayidda iyo shaqo ka joojinta xubnaha Guddiga**

1. Xubinnimada Guddiga waxaa lagu waayi karaa**:**

   i. geeri;

   ii. Istiqaalo qoraal ah oo uu gudbiyo Wasiirka;

   iii. Xil gudasho la'aan ka dhalata xaalad caafimaad darro;

   iv. xil-ka-qaadis ay Golaha Wasiiradda ku sameeyaan taasi oo ku salaysan soojeedinta Wasiirka;

   v. ku xadagudbidda Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa;

   vi. Haddii ay maxkamad ku riddo xukun ciqaab xabsi ah oo kama dambays ah;

2. Wasiirka wuxuu shaqo ka joojin ku sameyn karaa xubin ka tirsan Guddiga Maamulka:
    i. Haddii xog wadata caddaymo ku filan lana xiriirta hab-dhaqanka xubintaas la horkeeno Wasiirka taas oo horjoogsan lahayd magacaabistiisa haddii uu ka war qabi lahaa Wasiirka;
    ii. Haddii ay si joogto ah u carqaladaysa habsami u socodka shaqada H.B.S;
    iii. Xil gudasho la'aan darteed;
    iv. Wadashaqeyn xumo daran;
    v. Ka maqnaanshiyaha toban (10) fadhi oo isku xiga fadhiyada Guddiga cudurdaar la'aan;
    vii. In ay musalafto.
    viii. Haddii xubin guddiga ka mid ah bixiso xogaha HBS, ama suuqyada la geeyo xogaha iyo howlaha HBS
    ix. Haddii xubin guddiga maamulka HBS ah xiriir la sameeyo shirkad ama shirkado heshiis lala galay ama wadahadal wax soo saar wadaag ah kula jirta Wasaaradda ama HBS, iyadoo aan loo idman.

**Qodobka 18aad: Xuquuqda maaliyadeed ee xubnaha Guddiga**

Guddoomiyaha iyo xubnaha Guddiga waxay yeelanayaan xuquuq uu jaan-goynayo Wasiirka.

**Qodobka 19aad: Xilka Guddoomiyaha ahna Maareeyha Guud ee H.B.S**

Guddoomiyaha, ahna Maareeyaha Guud ee H.B.S, waa sarkaalka fulineed ee ugu sarreeya maamulka H.B.S. Guddoomiyuhu wuxuu u xilsaaran yahay:

i. Diyaarinta iyo fulinta siyaasadaha, qorshayaasha iyo barnaamijyada H.B.S iyo wasaaradda;
ii. U gudbinta Guddiga siyaasadaha, qorsheyaasha iyo barnaamijyada H.B.S. si uu u ansixiyo, ka dibna loogu gudbiyo Wasiirka.
iii. Siin Guddiga warbixinno joogta ah oo ku saabsan fulinta siyaasadaham barnaamijyada iyo qorsheyaalka H.B.S.;
iv. Socodsiinta iyo maareynta howl-maalmeedka H.B.S;
v. Magacaabista, maamulka iyo korjoogtaynta shaqaalaha H.B.S si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka iyo xeer-nidaamiyeyaalkiisa isagoo la tashanayo wasiirka wasaaradda.
vi. Matelaadda Guddiga iyo H.B.S;
vii. Guddoominta fadhiyada iyo kulamada Guddiga;
viii. Wada shaqayn la yeelanayaa hay'adaha hormuudka ka ah hawlaha la xiriira

batroolka;

ix. Ka talabixinta arrimaha hoos imanaya masuuliyadda H.B.S hadba markii loo baahdo; iyo

x. Fulinta waajibaadkiisa si waafaqsan Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyeyaalkiisa.

**Qodobka 120aad: Xilwaayidda Guddoomiyaha**

Guddoomiyuhu, ahna Maareeyaha Guud, wuxuu xilkiisa ku waayi karaa si waafaqsan Qodobka 19(3)(3) ee Sharciga Batroolka iyo Qodobka 16aad ee Xeer-nidaamiyahaan.

**Qodobka 21aad: Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha H.B.S**

Hawlwadeennada iyo shaqaalaha H.B.S waxaa lagu dhaqayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Federaalka Soomaaliya. Maamulka shaqaalaha qaybaha iyo howl maalmeedka H.B.S waxaa masuul ka ah Xoghayaha Guud, waxaan ku korjoogteeynaayo Maareeyaha Guud

**Qodobka 22aad: Ilaalinta siraha iyo xogaha H.B.S**

1. Iyada oo lagu salaynayo Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ku dabaqmaya, qof xubin ka ah Guddiga ama xubin ka tirsan shaqaalaha H.B.S waa in uusan faafin xog kasta oo uu helay muddadii uu shaqaynayay.
2. Qofka ka baxa xubinnimada Guddiga ama xubin ka tirsan shaqaalaha H.B.S waa in uusan faafin xog kasta oo uu helay xilligii uu shaqaynayay muddo 10 sanno ah, waana inaanay shaqaalaysiin, aanu u shaqayn ama aanu heshiis la gelin rukhsadle iyo/ama hawlwadeen si waafaqsan xeer-nidaamiyahan muddo 2 sannadood ah.
3. Qofka jebiya qodobkaan waxa uu galay fal-danbiyeed sida uu qabo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

**Qodobka 23aad: Baarista xisaabaadka H.B.S**

1. H.B.S waa inay si hagaagsan u kaydiso xisaabaadka iyo diiwaannada kale ee la xiriira dhaqdhaqaaqyada, hawlgallada, xisaabaadka iyo diiwaannada kale si waafaqsan shuruucda dhaqangalka ku ah maaraynta maaliyadda guud ee dalka.
2. Wasiirku waxa uu, wakhti kasta, soo magacaabi karaa hantidhawre baara xiisaabaadka H.B.S, wuxuuna u warbixintiisa baariseed u gudbinayaa Wasiirka ka hor inta aysan dhammaan muddada uu Wasiirku u cayimo soo gudbinta warbixinta baarista xisaabaadka iyo habka maaraynta maaliyadda H.B.S.
3. Xubnaha, saraakiisha iyo shaqaalaha H.B.S waa inay siiyaan hantid-dhowraha lagu magacaabay faqradda 2aad ee Qodobkaan dhammaan buugaagta, dukumentiyada, lacagta

naqdiga ah iyo hantida maaliyadeed ee H.B.S iyo macluumaad kasta oo ay ka warqabaan kuwaasi oo la xiriira hawlgallada H.B.S .

4. Hantidhawraha Guud ama hantidhawraha lagu soo magcaabay si waafaqsan faqradda 2aad ee qodobkaan waxa uu awood u yeelanayaa inuu u yeero isla markaana qiimeeyo dhammaan shakhsiyaadka uu u arko inay ku habboon yihiin in la baaro iyada oo ujeeddadu tahay in la helo xog la xiriirta qiimeynta iyo hantidhawridda xisaabaadka.

**Qodobka 24aad: Soo gudbinta warbixinno**

1. H.B.S waxay u gudbinaysaa Wasiirka warbixinno tifaftiran oo ku saabsan xilgudashadeeda, waxqabadkeeda iyo korjoogtaynteeda ku aaddan fulinta howlgallada batroolka lixdii billoodba mar.
2. Warbixinta lagu xusay faqradda kore waa inay daboosho xog taabanaysa balse aan ku koobnayn waxyaabaha soo socda:

    i. Goobaha u furan sahanka iyo waxsoosaarka batroolka;
    ii. Rukhsadaha sahaminta batroolka ee la bixiyay iyo kuwa la joojiyay;
    iii. Hawlaha batroolka ee la qabtay, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn, la wareegidda xogta iyo qodista ceelasha, sahanka, qiimaynta, horumarinta iyo waxsoosaarka (mugga saliidda iyo gaaska la soo saaray), wajiyada silsilad-qiimeedka batroolka;
    iv. Nuxurka iyo ka qaybgalka maxalliga ah ee hawlaha batroolka;
    v. Iibinta ama wareejinta saami;
    vi. Xaaladda hawlaha horumarinta iyo waxsoosaarka ee hoos imanaya rukhsad walba;
    vii. Sugidda iyo xaqiijinta kharashaadka qandaraasluhu soo dallaco si dib loogu celiyo;
    viii. Xaddiga batroolka la soo saaray iyo inta la saadaalinayo;
    ix. Hannaanka oo uu qayb ka yihiin tuubbooyinka cusub ee la dhisayo iyo hawlaha batroolka ee ay khuseeyaan;
    x. Mashaariicda cilmibaarista iyo horumarinta;
    xi. Canshuurta oo ay ku jirto khidmadda ay bixiyeen shirkadaha heshiiska lala galay;
    xii. caafimaadka, bedqabka iyo deegaanka;
    xiii. Hawlaha furfuridda,
    xiv. Xaaladda khayraadka ee la xiriirta:
        a) Wadarta mugga batroolka la iibiyay lana gudbiyay,
        b) Aagga aan laga faa'idaysan,

c) Aagga waxsoosaarku ka socdo,

d) Kaydka aagga waxsoosaarku ka socdo,

E). Khayraadka la helay balse aan weli la ansixin qorshahooda horumari

Khayraadka aagga la helay ee hadda loo arko “kuwo ganacsiga ka caaggan”;

a) Mugga haydro-kaarboonka asalka ah, kaydka la soo saari karo iyo kaydka la soo saari karo ee harsan (waxsoosaarka rasmiga ah ee marka laga jaro kharashka ku baxay waxsoosaarka) ee aag jira; iyo

b) Xog kasta oo kale oo uu Wasiirku u arki karo lagama-maarmaan.

3. Wasiirku wuxuu u gudbinayaa Golaha Wasiirrada Warbixinta Sanadlaha ah isaga oo raacinaya farriin kasta oo uu arko muhiim.

**Qodobka 25aad: Daabicista iyo shaacinta Warbixinnada iyo Xisaabxirka**

Soo koobid ku saabsan warbixinta sannadlaha ah iyo bayaanka xisaab-xirka waa in lagu daabaco websaydka H.B.S si dadweynuhu u helaan.

**Qodobka 26aad: Xeer-hoosaadka H.B.S**

1. Guddiga wuxuu sameyanayaa xeer-hoosaad u gaar ah H.B.S kaasi oo lagu nidaaminayo fadhiyadooda iyo fulinta waajibyadooda.
2. Guddiga waa inuu sida ugu dhaqsiyaha badan ula wadaagaa Wasiirka nuqul rasmi ah oo ah xeer-hoosaadka Guddigu dejiyo.
3. Xeer-hoosaadka ku sheegan faqradda kore waa in uusan ka hor imaanin qodobbada Sharciga Batroolka iyo Xeer-nidaamiyahaan.

**Qodobka 27aad: Isugu yeeridda kulan gaar ah ee H.B.S**

Wasiirka wuxuu isugu yeeri karaa H.B.S kulan gaar ah waqti walba isagoo ogeysiinaya ajendaha iyo qodobbada kulanka looga hadlayo afar iyo labaatan saacadood ka hor.

**Qodobka 28aad: Adeegyada dhinaca saddaxaad**

H.B.S waxa ay heli kartaa adeegyada shakhsiyaadka mihnadlayaasha ah waxayna lacagahaas u bixin kartaa si waafaqsan jaangoynta Wasiirka oo ay H.B.S hagayso.

**Qodobka 29aad: Wax ka beddelka Xeer-nidaamiyahan**

Golaha Wasiirradda ayaa wax ka beddel ku sameyn kara Xeer-nidaamiyahaan marka uuu Wasiirka Wasaaradda u soo jeediyo isagoo aragti ahaan qabo inay lagama-maarmaan u tahay ama muhiimad u leedahay dhaqangelinta ujeeddooyinka Sharciga Batroolka.

**Qodobka 30aad: Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahaan**

Xeer nidaamiyahaan wuxuu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiiradda.